# Qofka Masuuliyada leh

## PIC GA MASUULIYADA LEH AYAA QASAB AH INUU JOOGO DHAMMAAN SAACADAHA SHAQADA

## Muujinta aqoonta

Inta lagu jiro kormeerka, qofka masuuliyada leh (PIC) waa inuu awoodaa muujinta aqoontiisa kahortaga xanuunka cuntada ka dhasha. PIC gu waa inuu yaqaano:

- Sida waxyaabaha soo socda gacan uga gaystaan kahortaga xanuunka cuntada ka dhasha:
    - Nadaafada shaqsiga iyo farxalka
    - Ka hortagga gacmo qaawan in lagu
    - taabto cuntada u diyaarsan in la cuno
    - Waqtiga/xakamaynta heerkulka ilaalinta badqabka cuntada (TCS)
    - Maaraynta iyo xakamaynta isku gudbinta sunta
    - Ilalainta shaqada xarunta
- Sida looga hortago gudbinta xanuunka cuntada ka dhasha oo uu faafiyo shaqaale cudurka qaba ama xaalad caafimaad oo caabuq leh qaba.
- Astaamaha lagu yaqaano xanuunka cuntada ka dhasha.
- Khataraha ku xeeran cunista hilib ceeriin ah ama aan si fiican u bislaan, digaag, ukun iyo kaluun.
- Heerkulada iyo waqtiyada loogu baahan yahay cuntada TCS inta lagu jiro qaboow ku haynta, kulayl ku haynta, karinta, qaboojinta, iyo dib u kululaynta.
- Isha biyaha ee xarunta cuntada iyo sida looga difaacaayo inay dib u haloowdo ama cunto kale ugu gudubto.
- Inta badan xasaasiyadaha wayn ee cuntada iyo astaamaha falcelinta xasaasiyada.
- Sida qalabka loo ogolaaday xaruntu ugu filan yahay xaqiijinta badqabka cuntada.
- Hanaanka nadiifinta iyo jeermis ka dilista dusha meelaha cuntada taabato.
- Sida loo aqoonsado agabka sunta ah loona xaqiijiyo kaydkooda amaanka ah, ku shaqayntooda iyo qashin ku daristooda.
- Sida loo aqoonsado baraha xakamaynta muhiimka ah laga bilaabo iibsiga ilaa iibinta iyo adeegga, iyo talaabooyinka lagu xaqiijinaayo in baraha la xakameeyo.
- Sida PIC iyo shaqaaluhu ugu dhaqmayaan qorshaha barta qiimaynta iyo xakamaynta adag ee khatarta (HACCP), haddii qorshaha HACCP qasab yahay.

Waxaa qasab in PIC uu awoodo inuu sharxo:

- Waajibaadka PIC, shaqaalaha iyo maamulka sharciyaynta.
- Sida goobta ugu dhaqanto shuruudaha xanuunka shaqaalaha, sida soo sheegida, iyo ka saarida shaqada ama xayiraada.

## Waajibaadka PIC

PIC ayaa masuul ka ah xaqiijinta farsamooyinka maamulida cuntada oo badqab leh xili kasta. PIC waa inuu xaqiijiyaa in:

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Person in charge_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

- Dhammaan shaqaaluhu fahmaan shuruudaha soo sheegida xanuunka shaqaalaha.
- Shaqaale jiran laga xanibo ama laga saaro shaqada sida la amro.
- In farxalka shaqaalaha la kormeero.
- In shaqaaluhu ka hortagaan isku gudbinta sunta cuntada u diyaarsan in la cuno kadib ku taabashada gacmaha qaawan ayagoo adeegsanaaya qaababka waxtarka leh sida tiishka deli, malaas, birqabato, gacmo gashiga halka mar la isticmaalo ama qalabka cabitaanka qaybiya.
- In shaqaaluhu yaqaanaan ku haynta cuntada qaboow, karinta, qaboojinta, dib u kululaynta iyo kulayl ku haynta cuntada TCS heerkullada ku haboon iyo waqtiyada loo baahan yahay.
- In shaqaaluhu si joogto ah ula socdaan heerkulka iyo waqtiga.
- In shaqaaluhu adeegsadaan qaababka saxda ah ee jeermis ka dilista meelaha cuntada taabato.
- In shaqaaluhu la socdaan ama xaqiijiyaan in cuntada si badqab leh looga helay ilaha cuntada ee la ogol yahay.
- In shaqaaluhu qabaan tababarka ku haboon ee badqabka cuntada, ayna ku jirto inay yaqaanaan xasaasiyada cuntada ka dhalata.
- Inuu soo dhajiyo boorka talo bixinta macmiilka ee la xariirta khataraha sii kordhaaya ee cunista cuntada ceeriinka ee xawaanka ama qayb ahaan la karshay.
- In macaamiisha ku laabta aagaga ay ka adeegtaan sida baararka saladka loo sheego inay adeegsadaan xaashida miiska oo nadiif ah.
- In aan shaqooyinka cuntada lagu qaban guri gaar ah ama meel la seexdo.
- In shaqsiyaadka aan muhiimka ahayn aan loo ogolaan aagaga diyaarinta, kaydinta iyo weel dhaqaalka cuntada.
- Martida, sida darawalada cuntada qaada, shaqaalaha dayactirka ama shaqaalaha cayayaanka buufiya, waa inay ku dhaqmaan shuruudaha xeerka cuntada.
- In la hayo habraacyada qoran iyo qorshayaasha qasabka ah laguna dhaqmo.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Person in charge_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

Hennepin